Wargayska Hormarka Xirfadlaha (PD) DCYF

Soo dhawow!

Waxaa farxad noo ah inaanu qormadii ugu horreeyay ee Wargayska PD soo saarno! Waxaa noo qorshaysan inaanu ka dhigno daabacaad joogto ah oo aanu u adeegsano si aanu kuula socodsiino shaqooyinka cajiibka ah ee aanu u hayno bulshadeena! Waad ku mahadsan tahay inaad inta aad wakhti siiso akhrido. Haddii aad doonayso inaad ansabiskiraayb garayso adeeggan, fadlan iimeel ugu dir Marlene White: marlene.white@dcyf.wa.gov

Shahaadada Gaaban ee Booqashada Guryaha Washington

Shahaadada gobolka ee u gaarka ah Booqashada Guriga iminka waa la heli karaa! Kadib markii waxyaabo badan lagu daray shahaadada gaarka ah ee Booqashada Guriga, dadka aanu wada shaqayno waxay ka dhigeen koorsada mid 3 dhibcood ah: ECED& 138 Booqashada Guriga / Wada Shaqaynta Qoyska.

Ku soo darista koorsada Booqashada Guriga waxay u sahlaysaa in kuuliyaduhu bixiyaan 20 Kiridhit oo Shahaadada Gaaban ee ECE ah oo U Gaar ah Booqashada Guriga. Shakhsiyaadku waxay u isticmaali karaan shahaadadan si ay u xoojiyaan doorkooda Booqashada Guriga ama inay u noqoto meesha ay ka duulayaan marka ay doonayaan inay diyaariyaan digriiga ECE.

Waxaa ay dhawr kuuliyadood ku bixiyaan onlayn Washington oo dhan. Waydii bulshadaada deegaanka ama kuuliyadda farsamada si aad macluumaad dheeraad ah uga ogaato bixinta Shahaadada Gaaban ee ECE ee Booqashada Guriga Gaarka u ah.

Natiijada Ardayda ee Ugu Danbaysay ee dhammaan Shahaadooyinka ECE

Sanadkii lasoo dhaafay, kooxda guddida xubnaha Diyaarinta Macallinka Carruurnimada Hore oo ka socda siddeed kuuliyadaha bulshada iyo farsamada ah ayaa isku yimid si ay wax ugu biiriyaan shaxda koorasyada caamka ah ee Shahaadada ECE ee Washington. Shaxda koorsada waxaa lagu sheegey waxyaabaha caamka ah ee laga filan karo marka ardaydu ay dhammeeyaan kooradyada. Kuuliyad kastaa waxaa laga filayaa inay wax ka beddesho koorasyada silbiskeeda si loo sii wado isticmaalka cinwaanada caamka ah iyo tirooyinka. Yoolka hawshani waa in lagu bixiyo fursado hormar xirfadeed oo la xidhiidha xoogga shaqaynaya ee wakhtigan iyo mustaqbalka.

Hoos waxaa ku yaal aagagga diiradda ay saarayso shaqadani:

- Samaynta xirfado fiicnida dhaqan, ilaalinta dhaqan oo fasal kasta lagu qaato

- Qorista natiijada; waxay u sahlaysaa dadka wax baranaya, macallimiinta, iyo shaqaalaha inay gartaan hormarka
- In la yareeyo kharashka buugaagta iyo khayraadka
- Iyada oo la wada dul marayo dhammaan natiijooyinka ardayda ee Aqoonta Muhiimka ah ee Gobolka Washington iyo Heerarka Diyaarinta Macallinka NAEYC

Koox hawleedka u dhigma

DCYF waxaa ka go'an inay mariso dhabbooyin dhaqan ahaan fiican bixiyayaasha waxbarashada hore si ay u buuxiyaan shuruudaha waxbarasho ee uu dhigayo WAC 110-300 wax laga baddalay ee dhaqangeli doona Ogoosto 1, 2019.

WAC wax laga baddalay waxaa kamid ah sharaxa 'u dhiganka' marka la tixraacayo shuruudaha waxbarasho. Sharaxan waxaa uu dhigayaa:

> *'shakhsiga waxaa loo oggol yahay in uu buuxiyo shuruudaha cutubkan isagoo adeegsanaya caddayn kale oo waaxdu aqoonsan tahay, ama soo bandhigga aqoonta, taas oo muujinaysa aqoon lamid ah caddaynta kor lagu magacaabay.'*

DCYF waxay koox shaqo oo ka kooban xirfadlayaasha waxbarashada hore, xubnaha bulshada, iyo dadka la shaqeeya iskugu keentay si ay u sharixi karaan in dheeraad ah oo ay u samayn karaan nidaam si loo buuxiyo shuruudaha waxbarashada wax laga baddalay. Koox hawleedkani waxa uu samayn doonaa talobixin 'u dhiganka' DCYF taas oo ay kamid noqon doonto:

- Liiska shahaadooyin iyo caddaymaha la aqoonsan yahay
- Qaab loo aqoonsanayo aqoonta iyo xirfad jirta

Koox hawleedku waxay kulmi doonaan inta lagu jiro Janaayo 2019. Wax ka baddalka iyo qabyo-qoraalka koox hawleedku soo saaraan waxaa la gelin doonaa websaytkan qaybta hormarka xirfadlaha ee ay leedahay DCYF.

Coaching Companion waxaa ku socda dib-u-dhis!

Cultivate Learning waxay ku sameeyeen hormar Coaching Companion si si fudud loogu isticmaali karo. Soo saaridda agabta wax laga baddalay waxaa ay soo bixi doonaan Janaayo 2019!

Tabobarada, webinarada iyo saacadaha shaqada ferjuwaalka ah waxaa la heli doonaa dhammaan Janaayo 2019 si looga caawiyo bixiyayaasha qaybta cusub.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee isbaddalkan ku aaddan, la xidhiidh: cultiv8@uw.edu

Wax Ka Baddalka Tabobarka

DCYF waxay soo saartay mudnaanaha tabobarka taas oo ku salaysan tilmaamo sharci ah, baahiyaha bulshada, iyo macluumaadka diyaar u ahaanta dugsiga ee laga helo WaKIDS iyo sidoo kale macluumaadka bixiyaha ee ka yimi Early Achievers. Mudnaanahan waxaa kamid ah:

Xisaabta Hore - Ma ogtahay in kaliya 66% carruurta ay galaan xannaanada iyaga oo leh xirfadaha u diyaar ahaanta xisaabta? DCYF marka la joogo, waxaanu kala shaqaynaa dadka aanu qacansaarka leenahay ee gobolka oo dhan sidii kor loogu qaadi lahaa tabobarta xisaabta hore. Waxaanu diiradda saarnaa:

- Nidaamyada xisaabta iyo fikirka carruurta yaryar iyo;
- Taageeridda bixiyayaasha oo habkooda ku waajahayaan xisaabta ah.

Si taas aanu u samayno, waxaanu wax ka ogaanaa baahiyaha bulshooyinka anaka oo samaynayna aqooniswaydaarsi kooxeed oo dhawr ah. Ma doonaysaa inaad adna sidoo kale wadaagto fikirkaaga? Xataa haddii aanad ka qaybgalin aqooniswaydaarsiga kooxda, wax baad kusoo biirin kartaa waxbarshadeena adiga oo buuxinaya xog uruurintan gaaban oo halkan aad ka heleyso:https://www.surveymonkey.com/r/M8RPBXS . Waxaad filataa in tani qaadato ilaa 10 daqiiqo, oo ay kamid noqon doonto dhawr liis oo aad kala dooran karto.

Ardayda Labada Luuqadood - 32% carruurta yaryar (dhalasho-8) waxay bartaan wax ka badan hal luuqad Washington, waxaana korodhku uu ku libilaabmay inta gobolada kale! Waxaynu ognahay inay jiraan faa'idooyin ay leedahay marka lagu hadlo wax hal luuqad ka badan - markaa bulshooyin badan ayaa ka shaqeeya sidii loogu ololyn lahaa sidii loo ansixin lahaa HB1445 taas oo DCYF ku waajibinaya inay raacdo:

- Tabobarka - Tan waanu tijaabinaynaa iminka! Eeg MERIT wixii taariikhaha iyo goobaha aaggaaga ah! Tani wax kharash ah kuma taagna dadka ka qaybgalaya waxaanad heli kartaa 12 STARS saacadood ee taxanaha dhammaystiran.
- Tabobarayaasha - Waxaanu la shaqaynaynaa Cultivate Learning si tabobarayaashu u taageeri karaan bixiyayaasha dhammaystiraya tabobarka.
- Baahinta - Waxaanu doonaynaa inaanu la wadaagno faa'idooyinka barashada laba luuqadood qoysaska! waxaad arrinkaas nagaga caawin kartaa adiga oo khayraadka la wadaagaya ee sidoo kale lagu sheegey tabobarka:https://weareoneamerica.org/speak-your-language/

Si aad u akhrido qoraalka dhammayskatiran ee hindise-sharciyeedka, fadlan booqo websaytka sharci-dejinta Gobolka WA: https://app.leg.wa.gov/billsummary?Year=2017&BillNumber=1445

Nidaamyada Shaqo ee Xarumaha iyo Guryaha Qoyska - Si loo gaadho oo meeshaana loogu hayo barnaamijyo waxbarashada hore oo aad u tayo sarreeya, waxaa muhiim ah in la ballaadhiyo korriinka ardayda iyo inay yeeshaan xirfadaha hoggaanka ganacsiga. Waxaanu bilaabaynaa inaanu samayno fursado waxbarasho oo diiradda lagu saarayo maamulidda ganacsiga, taas oo leh yoolka in gobolka oo dhan laga heli doono 2021. Guriga qoyska iyo bixiyayaasha xarunta ku salaysan waxaa u suurtogalaysa inay hormariyaan xirfadahooda:

- Miisaaniyad samaynta
- Suuqgeynta
- Maamulka Shaqaalaha
- Dhaqaale Uruurinta

Shuruudaha Caafimaadka & Badbaadada CCDF

DCYF waxay iminka bixisaa Tabobarro Caafimaadka & Badbaadada ah oo cusub oo ay siisaa bixiyayaasha liisanka haysta si ay u buuxiyaan shuruudaha caafimaadka iyo badbaadada federaalka. Tabobarradan cusub waxaa lagu bixiyaa onlayn ahaan iyo sidoo kale manhajka wax laga baddalay ee Aasaasiga Daryeelka Ilmaha.

TANI MAXAY UGA DHIGAN TAHAY BIXIYAHA LIISAANKA HAYSTA?

Haddii aad hore u buuxisay Aasaasiga Daryeelka Ilmaha (ama aan buuxisay shuruudaha iyada oo dariiq kale ah) markii la gaadhay ama kahor Oktoobar 1, 2018, waxaad wakhtigan buuxisay shuruudihii caafimaadka iyo badbaadada tabobarka oo lagaaga baahna umana baahnid inaad dhammaystirto tabobarradan cusub ee Caafimaadka & Badbaadada. Dadka buuxiyay shuruudaha, Tilmaame Caafimaad & Badbaado oo ka hadlaya mawduucyadan cusub ayay ka heli karaan:https://dcyf.wa.gov/services/earlylearning-profdev/early-learning-provider/training-library

MACLUUMAADKA DHEERAADKA AH EE KU SAABSAN TABOBARKA CAAFIMAADKA & BADBAADADA

- Weli waxaad dhammaysan kartaa tabobarka! DCYF waxay aad ugu talisaa tabobarka. Haddii xiitaa aad hore u buuxisay shuruudaha - dhammaan dadka la shaqeeya carruurta waxay ka faa'idi karaan macluumaadka dheeraadka ah iyo sharax dheeraad ah oo la bixiyo si carruurta badbaadadooda loo sugo oo kor loogu qaado tayada daryeelka.
- Dhibcaha STARS laguma heleyo tabobarradan.
- Tabobarrada waxaa laga heli karaa deltraining.com. Riix 'Required Training' badhanka ah si aad tabobarka u doorato.

Fursadda Waxbarashada: Webinaarka MERIT!

Kasoo qaybgal Arbacada, Janaayo 9, 2019, 6 galabnimo si aad macluumaad uga ogaato sida loo bilaabayo MERIT! Kani wuxuu noqon doonaa webinaar toos ah, oo falgal leh oo loogu talogalay bixiyayaasha daryeelka carruurta, loo-shaqeeyayaasha ama cid kasta oo taageerta xirfadlayaasha waxbarashada hore ee ku cusub MERIT ama aan aqoonin MERIT. Kani maaha waajib ee waa khayraad dheeraad ah. Qodobada soo socda ayaa laga wada hadli doonaa:

- Qaybta websaytka DCYF ee laga heleyo agabka taageerada MERIT
- Isduwaangelinta MERIT
- Dalbashada Aqoonsiga STARS
- Soo Gudbinta Baadhitaanka Taariikhda Hore ee la Qaadan Karo (PBC)

Halkan iska duwaangeli: https://attendee.gotowebinar.com/register/2342998101676799245
Kadib marka aad isduwanageliso, waxaa laguu soo diri doonaa iimeel caddayn ah oo ay la socdaan macluumaadka sida loogu soo biirayo webinaarka.

Sidee ayaan sameynaynaa?

Waxtar ma kuu yeeshaan tani? Fadlan noo sheeg sidaan wax usoo bandhignay ama talo na sii adiga oo soo buuxinaya xog uruurintan gaaban. Aad ayuu u gaaban yahay, kaliya waa 5 su'aalood: https://www.surveymonkey.com/r/5PLMBXZ

Joogto Ugu Xidhnaw!

Ma doonaysaa in wararka ugu danbeeya si joogto ah laguugu soo diro? Isduwaangeli si aad u hesho iimeelka wargeyska PD Marlene White marlene.white@dcyf.wa.gov | 360-628-7115